



(Ilaahay wuxuu tusaale u keenay jid toosan

Nawaas Binu Samcaan Alansaari Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: (Ilaahay wuxuu tusaale u keenay jid toosan, labada dhinac ee jidkana ay ka xigaan labo darbi oo ay ku yaalaan albaabo furan oo daahyo ka lushaan, albaabka jidkana waxaa taagan mid dhawaaqaya oo leh: dadow soo gala dhamaantiin jidka, hana ka leexanina, iyo mid kale oo ka dhawaaqaya jidka korkiisa markii uu damco inuu furo mid ka mida albaabadaa, wuxuu oronayaa: waarr hooge ha furin, hadaad furto waad galin, jidkaasi waa Islaamka, labada durbina: waa xuduuda Ilaahay, albaabadan furana waa wixii Ilaahay xarimay, kan jidka madaxiisa ka dhawaaqaya waa kitaabka Ilaahay, kan jidka dushiisa ka dhawaaqayana waa waanada Ilaahay ee qofkasta oo muslima qalbigiisa ku jirta).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay At-tirmidi iyo Axmed]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey inuu Ilaahay Islaamka tusaale ugu keenay dariiq toosan, ee fidsan oo wax qalqalooca aan lahayn, dariiqaa labadiisa dhinac labo darbi ayaa ah, kuwaasoo xuduudii Ilaahay dhigay ah, waxaa labadaa darbi dhexdooda ah albaabbo furan oo ah xaaraantii uu Ilaahay xarimay, albaabadaasi waxay leeyihiin daahyo qofka jidka marayaa uusan arkayn waxa ku jira, dariiqa bilawgiisa waxaa fadhiya mid u yeeraya dadka oo tilmaamaya oo farayana inay dariiqa ku socdaan oo aysan u leexan dhinacyada, kaasoo ah kitaabka Qur'aanka ah, waxaa jira mid kale oo ka dhawaaqin jidka korkiisa, midka dadka u yeeraya markastoo qofka jidka maraya uu damco inuu inyar ka furo daahyada wuu u diidayaa, wuxuuna oronayaa: war hooge ha furin! hadaad furto waad galin naftaadana kama hayn kartid galidee, kaasina waa waanada Ilaahay ku abuuray qalbiga qof kasta oo muslima.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65049>